


NAFTAADA KA ILAALI XANUUNADA NEEF- MAREENKA



Hargabka, COVID-19, iyo Respiratory Syncytial Virus (RSV, Fayruuska Unugyada Neef-mareenka)

- Hargabka, COVID-19, iyo Respiratory Syncytial Virus (RSV, Fayruuska Unugyada Neef-mareenka) waa fayrasyada neef-mareenka caadiga ah ee socda marka la joogo xilligan oo kale sanadka. Sannadkii hore, waxaan aragnay heerar sare oo xanuunada neef-mareenka ah iyo isbitaal dhigis ka timid hergabka , COVID-19, iyo RSV. Nasiib wanaag, waxaan haysanaa tallaalo naga ilaalin karta xanuunada daran, isbitaal dhigista, iyo dhimashada ka timaada xanuunadan neef-mareenka.
- Qaadashada sanadlaha ah ee tallalka hargabka iyo la socoshada tallalka COVID-19 ayaa adiga iyo kuwa aad jeceshahay siinaya daawooyinka ugu wanaagsan ee xanuunada halista ah iyo ka hortagga dhimashada. Tallaalada hargabka iyo tallaallada Covid-19 ee la cusboonaysiiyay 2023-24 ayaa labadaba la heli karaa waxaana loogu talinaaya qofkasta oo ka weyn da'da 6-da bilood. Haddii aad ka weyntahay da'da 60 sano ama aad hadda uur leedahay, waxaa laga yaabaa in aad u qalanto tallalka RSV . Tallalka RSV ee la qaato xilliga uurka ayaa la ogaaday in uu dhallaanka ka ilaaliyo xanuunada halista ah ee ka dhasho RSV. Alaabada difaaca jirka ee RSV ayaa lagu talliyay dhammaan carruurta ka hor da'da 8 bilood haddii waalidka aan la tallalin xilliga uurka. La hadal daryeel bixiyahaaga caafimaadka si aad uрагто haddii ay tahay in aad qaadato tallalka RSV , ama haddii ilmahaagu uu helaayo daawooyinka RSV .
- Wuxaad heli kartaa tallalkaaga hargabka iyo tallalkaaga COVID-19 isla maalintaas sida adiga kugu habboon . Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim in aad qaadato labada tallal sida ugu dhakhsiyada badan ee aad u awoodo. Kala hadal daryeel bixiyahaaga caafimaadka wax ku saabsan helitaanka tallalka RSV iyo tallaallada kale haddii aad u qalanto.



Is-tallaal

Difaacaaga ugu wanaagsan ee ka hortagga xanuunada neef mareenka



Gacmaha dhaq

Si joogta ah u dhaq gacmahaaga adiga oo isticmaalaya saabuun iyo biyo



Is-karantiil haddii aad xanuunsantahay

La soco astaamaha oo isku diyaari in aad iska karantiisho dadka kale haddii aad xanuunsantahay



Tixgeli xirashada afxir

gudaha goobaha meelaha ay dadku ku badan yihii